


# Waxa ka cusub nidaamka isdiiwaangelinta

## Macluumaadka loogu talagalay qoysaskaa

## Maxaa isbedelay?

Isbedelada soo socda ayaa lagu sameeyey Isdiiwaangelinta Kindergarten (Kindergarten) ilaa Fasalka 12-naad (Year 12) nidaamyada waxayna khuseysaa dhammaan diimaangelinta dugsiyada dawlada laga bilaabo Teeramka 1-aad 2026.

### Waxa ka cusub iska diiwaangelinta dugsiga xaafadaada aan ku oolin

2025 dhexdiisa, waxaan soo saarnay shuruudo mudnaanta lagu kala siinayo codsiyada dugsiyada aan xaafadaada aan ku oolin ee ardayda leh baahida fayoqabka iyo waxbarasho qaarkood, walaalaha ardayda haddaba ka diiwaangashan, iyo carruurta shaqaalaha dugsiga.

2026 dhexdiisa sidoo kale diiwaangelinta dugsiga aan xaafadaada ku oolin waxaa mudnaanta lagu kala siin doonaa:

- ardayda Aboorijin iyo/ama Torres Strait Islander ah in loo aqoonsado qoys iyo dhaqan ahaantooda iyo kinship connections.
- Ardayda Kindergarten soo gelaysa ee dhigtay kindhada dugsiga ka hor ee ku yaal dugsiga dawlada ee NSW.

### Debecsanaan badan oo la siinayo carruurta xubnaha ciidamada

Nidaamyada diiwaangelinta waa la cusbooneysiiyey si loo hubiyo jajabnaan weyn ee diiwaangelinta dugsiga looga baahan yahay ee carruurta xubnaha ciidamada inta lagu jiro dib u dejinta inta guriyeynta la sugayo.

### Aqoonsiga Aborijinka iyo/ama Torres Strait Islander kinship

Dugsiyadu waxay yeelan doonaan jajabnaan ka sii weyn oo lagu diiwaangelinayo ardayda Aborijinka iyo/ama Torres Strait Islander, oo ay ku jiraan kinship connections, ammaanka dhaqanka, helitaanka masuusiyada dhaqameed iyo waxbarashada luuqada Aborijinka sida Sorry business.

### Sii wadida ardaydeena ugu jiliclan

Hagitaanka gaarka ah ee ardayda dammaanada iyo ardayda ka gudbeysa dugsiyada xarumaha caddaalada ardayga iyo xariga sidoo kale waa la diiwaangeliyey iyo codsiyada diiwaangelinta degaanka ee ardayda ee qaybtaan waxaa hadda wax laga qabanayaa 2 maalmood oo dugsiyeed.

# Su'aalaha Badanaa Laysweydiiyo

## Isbedelaadani ilmahayga miyey khuseeyaan?

2026 isbedelada nidaamka iska diiwaangleinta dugsiyada dawlada NSW waa kula xiriira adiga haddii:

- ilmahaagu inuu yahay Aborijin iyo/ama Torres Strait Islander ee kinship, luuqad ama tixgelinada dhaqameed
- ilmahaagu wuxuu ku jiray daryeel aan gurigaaga ahayn, dammiin, ama wuxuu ka baxayaa dugsi ku dhexyaal xarunta caddaalada dhalinyarada ama xabsiga
- mid ka mid ah waalidiinta ilmahaaga wuxuu ka soo shaqeeyey ama hadda ayuu ka shaqeeyaa ciidama difaaca waxaana laga yaabaa inay saameysay dib u dejinta laga doonayo oo ka dhalanaysa u shaqeynta ciidamaha difaaca ee Australia.

## Dugsi kasta ma laga doonayaa inuu dhaqangeliyo isbedeladaan?

Iyadoo ku xiran diiwaangelinta dugsigu inay bannaan tahay, dugsiyada waxaa laga doonayaa inay dhaqan geliyaan diiwaangelinta ardayda dugsiyada aan degaankaaga ku oolin ee ardayda isdiiwaangelinaya Teeramka 1 , 2026.

Isbedelada nidaamka isdiiwaangelinta ee carruurta aan degaanka degenayn ma saameyn doonto xaq u yeelashada waxa looga baahan yahay hababkaan takhasuska leh ama barnaamijyada, sida dugsiyada xulashada buuxa leh, dugsiyada ujeedooyinka gaarka leh (schools for specific purposes (SSPs)), dugsiyada fogaan wax ku barashada leh, iyo dugsiyada leh fasalada ama barnaamijyada xaq u yeelashada laga rabo (tusaale, fasalada fursada, cayaaraha takhasuska leh iyo/ama hal abuur ama jilida fanka ). Dugsiyadaan waxaa qabanaya nidaamkooda shuruudaha xaq u yeelashada iyo qiimeynta waxayna sii wadi doonaan inay raacaan nidaamyadooda isdiiwaangelinta ee hadda jira.

Dugsiyada halka jinsi leh waa inay dhaqan geliyaan isbedelada ilaa inta ilmaha isdiiwaangelinaya uu ka fuliyo xaq u yeelashada layska rabo ee jinsigaas. La xiriir dugsiga ay khuseyso si aad u weydiiso sida isbedeladaan u dhaqan gelayaan.

## Miyaa si toos ah loo aqbalayaa isdiiwaangelintayda degaanka kale haddii ilmahaaga uu fuliyo shuruuda la cusbooneysiiyey?

Isbedeladaani ma balan qaadayaan isdiiwaangelin ilmahaaga dugsiga dawlada ee aan degaanka ahayn. Dugsiyada aan ku oolin degaanka iyo diiwaangelinta degaanka diiwaangelintu waxay tixgelin doontaa codsigaaga. Dugsiyada leh diiwaangelinta dugsiyada aan degaanka ahayn ee xaddidan wuxuu mudnaanta siin doonaa diiwaangelinta dugsiyada aan degaanka ahayn ee:

- ardayda leh baahida waxbarashada iyo samafalka u baahan hagaajin macquul ah iyo/ama taageerada waxbarasho ee dheeraadka ah, oo ay ku jirto
  - Arday Aborijin ah iyo/ama Torres Strait Islander ka ee leh tixgelinta dhaqameed iyo/ama qoys ee kinship connections iyo xiriirada
  - Naafada
  - Da'da koritaanka
  - Dhibka
  - Su'aalaha ku saabsan ilaalinta ilmaha
  - Baahida shakhsiyeed iyo caafimaad iyo xaaladaha
- wallaalaha ardayda ee hadda dhigta dugsiga, ee wallaalaha ardayda ee qodobada taageerada oo la siiyey mudnaanta
- Ardayda imanaysa Kindergarten ee dhigan jiray kindhada dawlada iyo dugsiga.

La xiriir dugsiga ay khuseyso wixii macluumaad dheerad ah.

## Tan micnaheedu ma waxaa weeye ardayda kaliya ee fulinaya shuruuda mudnaanta ee diiwaangelinta dugsiyada aan degaankaaga ahayn ayaa la isticmaali doonaa hadda laga bilaabo?

Maya, waalidiinta waa la soo dhoweynayaa inay soo codsadaan inay ka diiwaangeliyaan ilmahooda dugsi kasta oo dawladeed haddii ilmuhu uu xaq u leeyahay inuu dhigto dugsiga iyo in dugsigu uu siin karo boos ilmaha ee helitaankooda diiwaangelinta. Dhammaan dugsiyada aan lahayn iska diiwaangelinta xaddidan ee la heli karo waa inay mudnaan siiyaan oo ay tixgeliyaan codsiyada marka loo eego shuruuda diiwaangelinta dugsiyada aan degaankaaga ku oolin.

## Codsigaygii hore ee iska diiwaangelinta dugsiyada aan degaanka ku oolin waa la diiday, laakiinse ilmahayga hadda wuxuu fuliyey shuruudaha la cusbooneysiiyey. Mar labaad ma soo codsan karaa?

Haa, haddii aad u codsatay ilmahaaga inuu dhigto dugsi aan degaankaaga ku oolin 2026 dhexdeeda codsigana la soo diidey, waad soo codsan kartaa mar labaad haddii ilmahaagu uu fuliyo shuruuda diiwaangelinta dugsiyada aan degaankaaga ku oolin. Fadlan raac talaabooyinka ku sharxan qaybta hoose, "Sidee baan u bedelaa meeshii aan ka diiwaangeliyey ilmahayga?".

## Waxaan gudbiyey codsigayga inaan daneynayo (Expression of Interest (EOI)) ee Year 6 ilaa 7 gudbida. Ma bedeli karaa meesha aan ka diiwaangeliyey ilmahayga?

Haa. Haddii ilmahaagu uu fuliyo shuruuda diiwaangelinta aan degaanka ahayn ee la cusbooneysiiyey, waxaad u soo diri kartaa codsi cusub dugsiga aan degaankaaga ahayn ee aad doorbideyso, xitaa haddii aad haddaba soo gudbisay EOI ee Year 6 ilaa 7 oo gudbid ah. Fadlan raac tallaabooyinka lagu sharxay qaybta hoose, "Sidee baan u bedelaa meeshii aan ka diiwaangeliyey ilmahayga?",

## Sidee baan u bedelaa meeshii aan ka diiwaangeliyey ilmahayga?

Xannaaneeyayaasha ama waalidiinta jaclaan lahaa inay ka diiwaangeliyaan ilmahooda dugsi aan xaafada ku ool waxay u baahan yihiin inay raacaan tallaabooyinkan si ay u bedelaan diiwaangelintooda:

**Codsiyada diiwaangelinta online ka ah**

1. Aad website ka dugsiga dadweynaha ee aad dooneysid inaad ka codsato diiwaangelinta, ka dibna guji diiwaangelinta (enrolment) doorashooyinka tusmada.
2. Bogga diiwaangelinta, ee ka hooseeya sidii aad u diiwaangelin lahayd (how to enrol) adoo aadaya guji link -ga codsiga diiwaangelinta online ka ah (online enrolment application).
3. Isla markaad dirtid codsigaaga isdiiwaangelinta, dugsiga waxaa laga yaabaa inuu boos ku siiyo oo aad u baahan tahay inaad ku aqbashid 14 maalmood gudahood.
4. Haddii codsigaaga la aqbalo, la xiriir dugsiga ilmahaagu uu hore uga diiwaangashanaa si aad diiwaangelintaas uga noqotid.

**Codsiyada foomka warqada ah**

1. La xiriir dugsiga aan xaafada ku oolin ee dawlada si aad u ogaatid haddii ilmahaaga ay boos siin karaan.
2. Haddii dugsigu uu boos siin karo ilmahaaga, fadlan buuxi foom codsi ah oo cusub, oo dugsigu ku siin karo.
3. Isla markaad dirto is diiwaangelinta ood gudbisid, waxaa laga yaabaa inuu dugsigu ku siiyo boos aad u baahan tayahay inaad ku aqbashid 14 maalmood gudahood.
4. Haddii codsigaaga la aqbalo, la xiriir dugsiga ilmahaagu hore uga diiwaangashanaa oo ka noqo diiwaangelinta.

## Ka waran haddii aanan lahayn cinwaan joogta ah ama dukumiintiga aqoonsiga ee loo baahan yahay?

Waxaa jira xaalado badan oo ardada laga yaabo lagu diiwaangelinayo caddeyn cinwaan la'aanteed. Xaaladahaan waxaa ku jira, laakiinse aan ku ekayn, tixgelinta dhaqameed, carruurta xubnaha ciidaha difaaca iyo carruurta ama dadka dhalinyarada ah ee ku jira daryeelka guriga ka baxsan, damiin ku jooga, ama ka gudbaya dugsiyada ku dhexyaala xarumaha caddaalada dhalinyarada iyo xabsiga. Fadlan kala xiriir dugsiga ay khuseyso wixii ah macluumaad dheeraad ah haddii aad dareemeysid intani khuseyso xaaladaada.

## Miyuu qorshaha 2025 ee diiwaangelinta iyo nidaamka isbedelayaa weli khuseysaa?

Haa. Isbedelada la soo saaray ee 2025 way sii soconaysaa inay khuseyso diiwaangelinta 2026 taana waxaa ka mid ah:

- Dhammaan ardayda ku jooga fiisaha deganaanshaha ku meel gaarka ah waxayna iska qori karaan dugsigooga xaafada ee dawlada, ee ku saleysan cinwaanka degaankooda.
- Wallaalaha hadda ka diiwaangashan dugsiga dawlada ayaa mudnaanta loo siiyaa diiwaangelinta dugsiga aan xaafadaada ku oolin, oo leh mudnaan la siinayo wallaalaha ardayda fasalada taageerada ah ee dugsiga dawlada ee xaqa loo leeyahay.
- Carruurta shaqaalaha dugsiga waxaa loo tixgelin karaa diiwaangelinta dugsiga aan xaafada ku oolin ee dugsiga dawlada.

Wixii macluumaad dheeraad ah ee ku saabsan isbedeladaan, ama in la hubiyaa haddii ay khuseyso ilmahaaga, lana xiriir dugsiga ay khuseyso.

## Xaggee ayaan ka heli karaa macluumaad intaas ka sii badan?

**Weydiimaha isdiiwaangelinta, la hadal dugsiga aad doorbideysid. Ka hel faahfaahinta xiriirka dugsigaaga ee:**
education.nsw.gov.au/find-a-public-school

**Wixii macluumaad dheeraad ah ee ku saabsan sidii laysaga qori lahaa dugsiga dawlada ee NSW:**
education.nsw.gov.au/enrolment

**Wixii macluumaad dheeraad ah ee ku saabsan sidii aad isaga qori lahayd dugsiga dawlada NSW degene ku meel gaar ah ahaan:**
https://www.deinternational.nsw.edu.au/

**Wixii ah weydiimaha guud ee diiwaangelinta, la xiriir xafiiska weyn ee Wasaaradda Waxbarashada:**
1300 679 332

**Adeega Turjumaanka Taleefanka**

Haddii aad u baahan tahay turjumaan kaa caawiya si aad ula xiriirto dugsiga ama Wasaaradda Waxbarashada, fadlan wac Adeega Turjumaanka Taleefanka 13 14 50 oo ku weydiiso turjumaan luuqadaada ku hadla. U sheeg xiriiriyaha lambarka taleefanka ee aad dooneysid inaad wacdid oo Khadka la soo geliyo si uu kaaga caawiyo wada hadalka. Adeegan wax lacag ah lagaama qaadi doono.